

2021-2022 BARNAAMIJKA KAALMADA TAMARTA GURIGA EE IOWA

FIIRO GAAR AH: MACAAMIISHA DEGAN

MA UGA BAAHAN TAHAY CAAWIN BIILKA KULAYLIYAHAAGA?

2021-2022 Barnaamijka Kaalmada Tamarta Guriga ee Dadka Dakhliga hoose (LIHEAP) ayaa loo aasaasay si uu u caawiyo mulkiilayaasha u qalmi ee dakhliga hoose leh ee Iowa iyo kiraystayaasha dakhligoodu hooseeyo inay bixiyaan qayb ka mid ah kharashaadka kulaylinta asaasiga ah xilliga kulaylinta jiilaalka.

Gargaarku wuxuu ku salaysan yahay dakhliga qoyska, tirada reerka, nooca shidaalka, iyo nooca guryaha.

Haddii aadan hubin meesha laga codsado, **Wac 2-1-1**, ama booqo <https://humanrights.iowa.gov/dcaa/where-apply> tsi aad ula xiriirto hay'adda wax-ka-qabashada bulshaada, ama u qor:

LIHEAP

Iowa Department of Human Rights

Capitol Complex

Des Moines, IA 50319

MARKAY TAHAY IN LA CODSADO:

- **Dadka duqayda ah (60 & wixii ka weyn) iyo/ama dadka naafada ah:**
Oktoober 1, 2021 ilaa Abriil 30, 2022
- **Dhammaan qoysaska kale:**
Nofeembar 1, 2021 ilaa Abriil 30, 2022

WAXA LA QAADANAYO:

- **Cadayn dakhli** (dhammaan xubnaha qoyska ee da'doodu tahay 19 iyo wixii ka weyn) Waxay ku xiran tahay nooca dakhliga qoyskaaga, dokumentiyada dakhliga ee 30-kii maalmood ee la soo dhaafay, 12 kii bilood ee la soo dhaafay, ama sannad-dugsiyeedka la soo dhaafay, hadba kii kuu fudud ama kuu faa'iido badan.
- **Caddaynta Lambarada Sooshiyaal Sikiyuuriti ee dhammaan xubnaha qoyska** (dokumentiyada ayaa loo baahan yahay)
- **Biilka kulaylka ee ugu dambeeyay**
- **Biilka korontada ee ugu dambeeyay**

DADKA QAATA GUNNOOYINKA:

Fadlan soo qaado nuqulada rashiidka jeegagaaga muddo 30 maalmood ah ka hor taariikhda codsiga, ama nuqul ka mid ah foomka canshuur celinta dakhliga federaalka ee ugu dambeeyay.

DHAKHLI GO'AN:

Dakhligaan waxaa ku jiri kara: Gunnooyinka Sooshiyaal Sikiyuuritiga, Dakhliga kaabida, Barnaamijka Maalgelinta Qoyska, Kaalmada Halyeeyga, Caymiska Shaqo la'aanta, iyo hawlgabka. Fadlan soo qaado nuqullada jeegagga 30-kii maalmood ee hore.

DADKA ISKOOD U SHAQAYSTA/BEERALAYDA:

Fadlan soo qaado nuqulka canshuur celintaadii ugu dambaysay ee dawladda dhexe.

RASIIDHYADA FIP:

Fadlan soo qaado Ogeysiiska Go'aankaaga DHS ee hadda ama la xiriir xafiiska deegaankaaga si aad u hesho macluumaad dukumenti la aqbali karo.

Haddii aad qaadato masruufka ama kaalmada carruurta, waxay sidoo kale u baahan doontaa in la xaqiijiyo. Dakhli dheeraad ah oo aan halkan lagu qorin ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

DHALIGA UGU BADAN

<u>Qoyska</u>	<u>Sanadka</u>
<u>Tirada</u>	<u>Dakhliga Guud</u>
1	\$25,760
2	\$34,840
3	\$43,920
4	\$53,000
5	\$62,080
6	\$71,160
7	\$80,240
8	\$89,320

Qoysaska leh in ka badan siddeed xubnood,
ku dar \$9,080 xubin kasta oo dheeraad ah.